

Milkiilaha Qaaliga ah,

OGEYSIISKA KA TIRTIRISTA GARAFIITIGA

Magaalada Seattle waxay heshay ogeysiis ku saabsan qarafiiti sharci darro ah oo lagu qoroy dhismahaaga.

In kasta oo Seattle ay tahay meel loogu yeero guri qurux badan, haddana garafiitiga ayaa dhibaato weyn ku haya magaaladeena. Ma ahna oo keli mid wax xumeyn kara; ee waxay ku abuureysa deggeneyaasha iyo ganacsatilaabooyinka qatada in ay dareemaan xasillooni daro waxayna hoos u dhigeysaa qiimaha hantida. Tilabo qaadista deg deg ah lagu tirtirayo garafiitiga ayaa ah habka ugu wanaagsan ee looga hortago in uu ku soo noqnoqdo bulshadaada dhexdeeda, waxayna gacan ka geysan doontaa nadaafadda magaaladeena.

Sharciga Magaalada Seattle ee nidaamka khashkhasaada Garafiitiga” Graffiti Nuisance Ordinance” wuxuu amrayaa milkiilayaasha guryaha in ay ka tirtiraan garafiitiga guryahooda muddo 10 maalmood gudahood. Haddii garafiitig ku saabsanyahay burcadnimo ama uu naceyb la xiriira, waa in lagu tirtiro 48 saacadood gudahood (Xeerka Sharciga Magaalada 10.07.010.). Haddi aad ku tirtiri aawayso grafiitiga wakhtiga kor ku xusan waxay kuu horseedi kartaa ganaaxyo iyo tilaabo sharci ah oo ka dhan ah dhismaha hantida. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xeerka qaska iyo khashkhashada, fadlan booqo:

<https://www.seattle.gov/utilities/protecting-our-environment/safe-and-clean-seattle/graffiti/graffiti-nuisance-ordinance>

Halka waxaa ku jira bug yar oo ay la socoto macluumaad ku saabsan maareynta ka tirtirida garafiitiga. Barnaamijka rinjiyeynta garafiitiga ee Seattle wuxuu bixin karaa macluumaad kaa caawin kara oo ku saabsan sida aad gurigaaga uga tirtiri laheyd garafiitiga. Wixii macluumaad dheeri ah, fadlan booqo websaydhka Ka Hortagga & tirtirista garafiitiga iyo sida loo soo sheegayo:

<https://www.seattle.gov/police/need-help/graffiti> ama wac (206) 625-5011.

Haddii loo baahdo turjumaad luqadeed, fadlan wac (206) 684-3000.

Haddii aagga ay dhibaataadu gaartay uu yahay dhismo taariikh ah, in la rinjiyeyo ma wanagsana. Fadlan wac Barnaamijka Ilaalinta dhismayaasha Taariikhiga ah, wixii macluumaad dheeri iyo akhbaar (206) 684-0228.

Ugu dambayntiina, Magaaladu waxay aqoonsan tahay in khashkhasahdu ay noqon karto jahawareer iyo waxyeello. Waxyeelo “Sumada ah” waa meesha shaqadooda ay ka arki karaan dadka kale. Haddi mudadu ay dheerato la sugo waxay xoojineysaa dhaqankooda. **Haddi si dhaqso leh loo tirtiro grafiitiga, waxay u badan tahay in dadka wax ku qoroya gidaarka aysan mar kale dhibateyn doonin gurigaaga.** Si aad u soo sheegto waxyeellada loo geystay gurigaaga

ama in aad dooneyso in aad hesho warbixin khasaraha caymiska ee lumay, fadlan kala xiriir
Waaxda Boliiska Seattle taleefanka
(206) 625-5011.

Si loo hubiyo u hoggaansanaanta xeerka qaska iyo khashkhashada, Graffiti Nuisance Ordinance
iyo in la hubiyo in aysan jirin arrimo ama su'aalo dheeri ah, kormeerah Magaalada ayaa soo
booqan doona guriga 10 maalmood gudahood si loo go'aamiyo haddii garafiitiga la masaxy.
Haddii garfiitiga mar hore la masaxy, fadlan na soo ogeysii adoo la xiriiraya adeegyada bulshada
Seattle - Seattle Public Utilities ee lambarka hoose.

Waad ku mahadsan tahay kaalmadaada aad naga siisay nadaafada Seattle. Haddii aad wax
su'aalo ama walaac ah qabtid, fadlan na soo wac ama emayl soo dir.

Si daacad ah,

Michael Eggers, Graffiti Enforcement Specialist
Graffiti & Illegal Dumping Division
Seattle Public Utilities
(206) 233-7086
michael.eggerts@seattle.gov